

TA



RASMIGA AH

الر

الجريدة

EE JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

5aad

Muqdisho 1 Oktoober 1977 L.

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

BIL SOO BAX

جريدة شهرية

5 shilin lambar waliba —

Sanadii waa Sh. Somaliya

— Lacagta

lagu

ee

aba  
ah

K O O B N I I N

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

Shareiga L. 61 ee 26 Set. 77 Sharciqa cigaabta ee Ciidammada Calooshooda u shaqaystayaasha iyo wixii la mid ah (mercenaries and similars) Eogga 1032

BOGGA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS ee 26 Oktoobar 1977 Magacaabid Agaasinka Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaalida L. 82. » 1034

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S., ee 3.9.77, Dhismaha iyo Qaabka Guud ee Lacagta MJDS. L. 83. » 1035

BOGGA SADDEXAAD

TALGOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.

Sharciga L. 61 ee 26 Set. 77 Sharciga ciqaabta ee Ciidammada Calooshooda u shaqaystayaasha iyo wixii la mid ah (mercenaries and similars).

**MADAXWEYNAHA**

**J. D. S.**

**ISAGOO ARKAY:** Xaashida laad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-caanka 21 Oktoobar 1969;

**ISAGOO ARKAY:** Sharciga kala ah 1,17,18,19 ee soo baxay Ida Luuliyo 1976 iyo sharci L. 6 ee 10. 9. 1976;

**ISAGOO ARKAY:** Talooyinkii ka soo fulay Golaha Wasii-radda ee Ururka Midowga Afrika (Res-31/34 — 30/11/76) oo ku saabsanaa in Dawladaha oo dhan ay soo saaraan sharci caqaabaaya Ciidammada Calooshooda u shaqaystayaasha ah (mercenaries and similars);

**ISAGOO AQOONSADAY:** Inay tahay lagama maarmaan in la soo saaro sharci xaaraantinimeeynaaya ciqaabaayana Ciidammada Calooshooda u shaqaystayaasha ah oo loogu talo galay inay duulimaad ku soo qaadaan Dalka Soomaaliyeed ama ay ku kacaan fal oo ka soo horjeeda Qarannimada, siyaasadda, dhaqaalaha iyo Midnimada Ummadda Soomaaliyeed.

**ISAGOO TIXGELINAAYA:** Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiirrada.

**Wuxuu soo saarayaa:**

Sharciga soo socda :-

**Qod. 1aad.**

Qof kasta oo ka mid ah, noqda Ciidammada Calooshooda u shaqeysta (Mercenaries) oo ay dawladdo shisheeye ah ama ururro kale u soo ki-reystaan si uu duulimaad ugu soo qaado dalka Soomaaliyeed wuxuu galayaa dembi, waxaana lagu ciqaabayaa dil.

**Qod. 2aad.**

Qof kasta oo dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed gudahiisa ama dibeddiisa ku dhaqaaqo inuu qoro, tababarro ama uu siiyo lacag dad ka mid noqda Ciidamo Calooshooda u shaqeysta ah (Mercenaries) ama u sahla ka gudubka dalka Soomaaliyeed wuxuu galayaa dembi, wuxuuna mutaysanayaa ciqaab dil ah.

**Qod. 3aad.**

Qof kasta oo shisheeye ama Soomaali ah oo ku kaca fal nooc kasta ha ahaadee oo wax u dhimaaya, qarannimada, dhaqaalaha, siyaasadda iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed waqtiyada dalka ugu jiro daafaca weerarka cadowga isagoo ulajeedadiisu tahay inuu wax u dhimo awoodda difaaca dalka, wuxuu muteeysanayaa ciqaab dil ah.

**Qof. 4aad.**

Qof kasta oo isku daya inuu ka fidiyo dicaayad dalka gudahiisa ama dibeddiisu arrimo la xiriira daafaca dalka iyo midnimada Ummadda isagoo ulajeedadiisu tahay inuu niyad jab ku rido Ciidammada Qalabka sida (disfattismo) wuxuu galayaa dembi dil ah.

**Qod. 5aad.**

Falalka ay ku kacayaan calooshood u shaqeystayaashu waxaa loo ictibaarayaa xaaraan bani-aadanimada ka baxsan, qofkii falalkaas ku kacana ka faa'iideysan mayo mana yeelanaayo xuquuqda maxaabiista da-gaalka ee lagu sheegay heshiisyada Dawliga.

**Qod. 6aad.**

Awoodda qaadista dacwadaha sharcigan lagu tilmaamay waxaa iska leh Maxkamadda Badbaadada dalka.

**Qod. 7aad.**

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Qod. 8aad.**

Sharci kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la buriyey.

**Qod. 9aad.**

Sharcigan waxaa lagu biirinayaa sharciyada dalka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Qof kasta waxaa qasab ku ah inuu u hoggaansamo sharcigan kuna qasbo qof kasta inuu raaco.-

Muqdisho 26.9.77

**MADAXWEYNAHA J.D.S.**

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre).

XEER Madaxweynaha JDS ee 26 Setember 1977 Magacaabid Agaasinka Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaalida L. 82.

### MADAXWEYNAHA

JDS.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lamb. 1, 17, 18, iyo 19 ee 1 Luul- iyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lamb. 25 ee 30 Abriile 1970 ee lagu dhisay Bankiga Horumarinta Soomaalida;

ISAGOO ARKAY: Qod. 27 ee Xeerka Lamb. 211 ee 22 Setember 1970 ee Bankiga Horumarinta Soomaalida gaar ahaan magacaabid Agaasimaha Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaalida;

ISAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in la magacaabo Agaasimaha Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaalida;

ISAGOO TIXGELIYEEY: Go'aanka Guddiga Maamulka ee Bankiga Horumarinta Soomaalida taariikhdu ahayd 7.7.1977;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee Xisbiga H.K.S. iyo Golaha Wasiirada.

### WUXUU XEERAYAA

Qodob qura

Marka laga bilaabo Ida Maarso 1977 waxaa loo magacaabay Jaalle Maxamuud Maxamed Nuur Agaasimaha Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaalida.

Xeerrarkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta uu saxiixo Jaalle Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 26-9-1977.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay  
Diiwaanka Lamb. 6 bogga Lamb. 23  
Muqdisho 31 Oktoobar 1977  
Hantidhawraha Guud  
G. Sare Cabdillaahi Warsame Nuur

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S., ee 3.9.77, Dhismaha iyo Qaabka Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS L. 83

### MADAXWEYNAHA

JDS.

MARKUU ARKAY: Xaashida koowaad, tan Labaad iyo tan Saddexaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Xeerka lambarkiisu yaha 2 ee 29kii Disembar 1961dii, kuna saabsanaa ammarka Maamulka xisaabaadka Dawladda;

MARKUU ARKAY: Xeerka lambarkiisu yahay 13 ee 20kii Maarso 1965kii kuna saabsanaa habeynta dhismaha qaabka joogtada ah ee Madaxtooyadii hore ee Golaha Wasiirada iyo Xafiisyadii la xiriiray iyo isbeddelkii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEEY: Ra'yiga Wasiirka Madaxtooyada;

MARKUU AQOONSADAY: In ay lagama maarmaan tahay in la dhiso habka iyo qaabka Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS, kaddib markii ay howshiisa si aad ah u ballaaratay;

### WUXUU XEEREËYEEY

Qod. 1aad.

Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS

Agaasinka Guud ee Lacagta wuxuu ka mid yahay Laamaha Madaxtooyad JDS, waxaana lagu dhisay sharciga lambarkiisu yahay 13 ee 20. 3. 1965 iyo isbeddelkii ka dambeeyey, wuxuuna si toos ah ugu xiran yahay Madaxweynaha J.D.S. xagga maamulka miisaaniyadda Madaxtooyada JDS.

Qod. 2aad.

Hawsha Agaasinka

Agaasinka Guud ee Lacagta Madaxtooyada JDS waxaa loo xilsaaray in uu fuliyo hawlaha soo socda:

1. Wax allaale wixii hawl ah ee la xiriira maamulka lacagta ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo dhammaan laamaha ku xeeran.

2. Oggolaashaha socdaallada ay dibedda ku aadaan dhammaan shaqaalaha Hay'adaha Dawladda ee shaqo ama ka qaybgala shirar ku saabsan iyo beddelaadda lacagaha sahay safar ahaaneed loo qaato, isagoo had iyo jeer kala arrinsanaya Madaxweynaha JDS.

3. Maamulka Fillooyinka Madaxtooyada JDS oo ay martida heerkaw Dawladeed ah ku soo degto.

Qod. 3aad.

Qaabka Agaasinka

Agaasinku wuxuu yeelan doonaa qaabka halkan ku lifaaqan oo ka mid ahaan doona xeerkan.

Qod. 4aad.

Xilka iyo awoodda Agaasinka Guud  
Agaasimaha Guud oo Madax ka ah Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS Waxaa xil ka saaran yahay, awoodna u leeyahay:

1. Kormeerka, habaynta, socodsiinta iyo qaybinta hawlaha Agaasinka, isagoo daryeelaaya danta guud ee Dawladda.

2. Tillaabooyinka la xiriira edbinta shaqaalaha, isagoo raacaya habka sharcigu farayo.

3. Bixinta talooyinka loo baahan yahay ee ku saabsan hawlaha Agaasinka.

4. La socodsiinta Madaxweynaha JDS wixii dhibaatooyin ah ee hadba Agaasinka soo foodsaara.

Qod. 5aad

**Waaxaha, Qaybaha iyo Xubnaha**

Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS wuxuu yeelan doonaa, si uu u fuliyo hawlaha loo xilsaaray ee lagu tilmaamay Qodobka 2aad ee sharcigan waaxyo, qaybo iyo xubno.

Qod. 6aad

**Magacaabidda Agaasimaha Guud**

Agaasimaha Guud waxaa lagu magacaabayaa xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS.

Qod. 7aad

**Magacaabidda Agaasimayaasha waaxaha**

Agaasimayaasha waaxaha waxaa lagu magacaabi doonaa xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS, kaddib markuu, uu soo jeediyo Wasiirka Madaxtooyada iyo talada Agaasimaha Guud ee Lacagta MJDS.

Qod. 8aad

**BURIN XEER**

Waxaa la buriyay xeerka lambarkiisu yahay 13 ee soo baxay 20-kii Marso 1965kii iyo wax allaale wixii xeer ah ee qodobbada xeerkan khilaafsan ama aan la socon karin.

Qod. 9aad

**Dhaqan gelid**

Xeerkan wuxuu u dhaqan gelayaa si dhaqsi ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3 Setembere 1977.

**MADAXWEYNAHA**

(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda  
Dr. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi

Wasiirka Madaxtooyada J.D.S.  
G. Sare Cabdi Warsame Isaaq

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay  
Diiwaanka Lamb. 5 bogga 204.

Muqdisho 29 Setember 1977.

Hantidhawrka Guud

G. Sare Cabdullaahi Warsame Nuur

**QAABKA AGAASINKA GUUD EE LACAGTA MJDS**

**JAGO Lam. HABKA & JAGADA DARAJADA XIRFADDA TIRADA**

**AGAASINKA GUUD**

69-0001	Agaasimaha Guud	A/2	Maamul	1
69-0002	Madaxa xubinta Golaha Ummadda	A/6	Maamul	1
69-0003	Madaxa xubinta xusuus-dhawrka	A/6	Maamul	1
69-0004/5	Sarkaal Fuliye	B	Kaaliye	2
69-0006/11	Farsamayaqaan Eleetronik	B	Farsame	5
69-0012	Xoghayaha Agaasimaha Guud	C/9	Karaani	1
69-0013	Makjinad Roge	C	Farsamo	1
69-0014/16	Makiinad Garaace	C	Karaani	3
69-0017/22	Karani xusuus-dhawrka	C	Karaani	6
69-0023/24	Farsamayaqaan Hawo-Qaboojiye	C	Farsamo	2
69-0025/26	Madax Adeege	C	Shaq. Hoose	2
69-0027/28	Boosta-qaade	C	Sha. Hoose	2
69-0029/63	Adeege	D	Shaq. Hoose	33

**AGAASINKA WAAXDA**

**LACAGTA IYO SHAQAALAHA**

	Agaasimaha Waaxda Lacagta iyo Shaq.	A/3	Maamul	1
69-1002	Madaxa qaybta Lacag. iyo Shaqaalaha	A/5	Maamul	1
69-1003	Madaxa xubinta shaqaalaha	A/6	Maamul	1
69-1004	Madaxa xubinta Lacagta	A/6	Maamul	1
69-1005	Mad. xub. Qaansheeg iyo Tirakoob	A/6	Maamul	1
69-1006	Madax. xub. Wakiil xisaabiyaha G.	A/6	Maamul	1
69-1007/16	Xisaabiyee	B	Fuliye	10
69-1017	Madax shufeer	B/7	Iskuduwe	1
69-1018	Madaxa Hagaajinta Makiinadaha Xaf.	B/7	Farsamo	1
69-1019/22	Sarkaal Fuliye	B	Kaaliye	4

69-1023/24	Makaaniko	C/9	Farsamo	2
69-1025/30	Makiino Garaace	C	Karaani	6
69-1031/42	Shufeer	C	Farsamo	12
69-1043/47	Hagaajiye Makiinada Xafiiska	C	Farsamo	5
69-1048/49	Makiino Roge	C	Farsamo	2
69-1050/61	Adeege	D	Sha. Hoose	12

AGAASINKA WAAXDA  
FIILOOYINKA IYO FARSAMADA

69-2001	Agaas. Waaxda Fillooyinka iyo Fars. A/3	Maamul	1
69-2002	Madaxa Qaybta Fillooyinka iyo Fars. A/5	Maamul	1
69-2003	Madaxa Xubinta Fillooyinka	A/6	Maamul 1
69-2004	Madaxa Xubinta Farsamada	A/6	Iskuduwe 1
69-2005	Beeryaqaan (Agronomo)	A	Aqoonyahan 1
69-2006/9	Kariye Sare	B/7	Kariye 4
69-2010/11	Madax kayd-haye	B/7	Fuliye 2
69-2012/14	Sarkaal Fuliye	B	Kaaliye 3
69-2015/16	Madax Fuundi	C/9	Farsamo 2
69-2017/18	Madax Sarmale	C/9	Farsamo 2
69-2019/20	Madax Korontoyaqaan	C/9	Farsamo 2
69-2021	Madax Renjiile	C/9	Farsamo 1
69-2022	Madax Tabasiyeeri	C/9	Farsamo 1
69-2023	Madax Dhuunyaqaan	C/9	Farsamo 1
69-2024/27	Soore Sare	C/9	Soore 4
69-2028/31	Makiinad Garaace	C	Karaani 4
69-2032/41	Kariye	C	Kariye 10

QAABKA AGAASINKA GUUD EE LACAGTA

JAGO LAMBAR HABKA IYO JAGADA DARAJADA XIRF. TIRADA

69-2042/66	Soore	C	Soore	25
69-2067/72	Dhar Dhaqe	C	Dhaqe	6
69-2073/74	Madax Beeraley	C	Beeraley	2
69-2075/89	Fuundi	C	Dhise	15
69-2090/104	Sarmale	C	Sarmale	15
69-2105/10	Korontayaqaan	C	Farsame	6
69-2111/15	Taleefoonyaqaan	C	Farsame	5
69-2116/17	Farsamayaqaan Hawo-qaboojiye	C	Farsame	2
69-2118/30	Rinjiile	C	Farsame	13
69-2131/36	Tabasiyeeri	C	Farsame	6
69-2137/39	Dawaarle	C	Farsame	3
69-2140/45	Dhuunyaqaan	C	Farsame	6
69-2146/51	Keyd-haye	C	Karaani	6
69-2152/54	Matooriste ceel	C	Farsamo	3
69-2155/204	Beeraley	D	Sha. Hoose	50
69-2205/14	Adeege	D	Sha. Hoose	10
69-2215/20	Nadiifiye	D	Sha. Hoose	6

AGAASINKA GUUD SOO KOOBIDDA JAGOOYINKA OO U KALA BAXA QAYB IYO DARAJO

EE Lacagta MJDS A2 A3 A5 A6 Isugeyn B7 B Isugeyn C Isugeyn Isugeyn Isugeyn  
A B C D JAGOOYIN

Agaasimaha Guud 1 2 3 8 8 17 17 35 63

1040 | Waaxda Lacagta & Shaqaalaha 1 1 4 6 2 14 16 27 27 12 61

| Waaxda Fillooyinka & Farsamada 1 1 2 6 6 3 9 140 140 66 220

Isugeyn Guud 1 2 2 8 15 8 25 33 184 184 113 344